



## In ka badan 60 Arday oo ka qayb galay Kulanka Golaha Ardayda

Arday matalaysa fasalka kasta oo ka kala socota sagaalka dugsi sare ee PPS ayaa Diisambar 1 kulan ku yeeshay Dugsiga Sare ee Cleveland kaasi oo loogu talagalay Kulanka Golaha Ardayda ee guud ahaan degmada oo uu isku duwidiisa lahaa xubin ka tirsan Guddiga, Nick Paesler.

Mawduucyada ay ka doodeen in ka badan 60 arday waxaa ka mid ahaa sinnaanshaha dhanka isirka, wada shaqeynta guddiga tala bixinta, saraakiisha khayraadka ee dugsiga, hoggaaminta iyo xiriirinta. Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero, iyo sidoo kale xubnaha Guddiga Waxbarashada ee Paul Anthony, Scott Bailey, Rita Moore iyo Mike Rosen, ayaa sidoo kale ka soo qay galay kulamada.

Kulankii galabnimada waxaa loogu talagalay qorshaha Aragti ee ay degmadu leedahay waxaana qayb ka ahaa hawlo taxane ahaa wax lagaga fikirayay oo loogu talagalay ardayda si ay u wadaagaan fikrado ku saabsan mustaqbalka waxbarasho ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Maxay waxbarashadu u ekaan doontaa sanadka 2030? Xirfadahee ayaa muhiim u noqon doonta in ay ardaydu yeeshaan? Sidee ayay tiknoolajiyadu isku beddeli doontaa?

Kulanka aqoon isweydaarsi ee Sargaalka Khayraadka ee Dugsiga waxaa ka soo qayb galay Xafiiska Booliiska ee Portland, Captain Tasia Hager, oo korka kala socda Qaybta Adeegyada Dhallinyarada oo u adeegta qiyaastii 200 oo dugsi oo ku yaala toddoba dugsi degmo oo leh ku dhawaad 100,000 arday.

Captain Hager wuxuu kulan jawaabo iyo su'aalo la isku weydiinayay la yeeshay ardayda isaga oo la wadaagay una sheegay in ay jireen wicitaano ka badan 5,000 oo sanadkii la soo dhaafay dhexmaray dugsiga-booliska-xafiiska. Marka la eego wicitaanadani, 500 oo ka mid ahi waxay ahaayeen kuwo dhanka dembiga la xiriira, iyada oo 13 dhanka xiritaanka dadka ah la sameeyay. Inta soo hartay waxay ahaayeen wicitaano uu wax ka qabtay maamuluhu.

Intii lagu guda jiray wada hadalkii socday ku dhawaad 90 daqiiqo, ardayda waxaa la siisay aragti guud oo ku saabsan [heshiiska ka dhexeeya dowladda](#) ee ku dhexeeya PPS iyo Xafiiska Booliiska ee Portland oo hadda dib eegis lagu sameynayo. Markii la weydiinayay in ardaydu garanayso SRO ay leeyihiin, kaliya mid ka mid ah ardayda ayaa garanayay magaca sarkaalka, arday kale ayaa sheegay in aanu garanayn waxay SRO ay tahay, iyada oo kuwo kale ay tilmaameen in aan la barin saraakiishooda.

Captain Hager wuxuu ka faallooday, "In mid ka mid ah caqabaduhu ay sababteedu tahay xafiiska oo aan haysan shaqaale ku filan -- waxay inta badan u wacdaan SRO si ay uga shaqeeyaan ilaalinta ammaanka, taasi oo ka dhigaysa in ay SRO dugsiga joogaan kaliya saddex maalmood toddobaadkii. Waa hadafka la leeyahay in la beddelo taasi iyada oo heshiiskani ee beddeli doono taasi."

Waxaa jiri doonaa kulan ay ardaydu horseed ka yihiin si looga wada hadlo saraakiisha khayraadka ee dugsiga kaasi oo la qaban doono Khamiista, Diisambar 6 laga bilaabo 3-5 galabnimo kana dhici doona 501 N. Dixon St. Dhammaan maamulayaasha Dugsiyada Sare waxay Jimcihii la soo dhaafay ogeysiisyo u direen ardayda, iyaga oo ku dhiirigeliyay in ay ka soo qayb galaan.

*-Cameron Vaughan*